


Faayruska Dabeysha (Polio)

(Poliovirus (Polio))



Dabeyshu waa xanuun dadka naafeeya oo halis ah oo waxaa keena faayrus. Faayruskan aad buu u faafaa oo si fudud ayaa la isugu gudbiyaa qof ilaa qof. Dabeyshu waa xanuun aafeeya habdhiska neerfaha oo waxay daciifisaa muruqaha. Xaaladaha qaarkood, dabeyshu waxay keeni kartaa naafanimo ama dhimasho. Ma jirto daawo loo qaato dabeysha, laakiin waxaa looga hortegi karaa tallaal keliya.

Sidee baa loo faafiyaa?

Faayruska dabeysha si degdeg ah ayuu u faafaa oo wuxuu jirka ka gelaa afka.

- ▶ Dadku waxay xanuunka dabeysha isku qaadsiyyaan:
 - ▶ Marka uu soo gaaro qoyaanka saxarada qofka xanuuunka qaba.
 - ▶ Marka ay soo gaarto hindhisada ama qufaca qofka xanuuunka qaba.
 - ▶ Taabashada ama gelinta afka ah ee wax uu soo gaaray qoyaan yar oo ah saxaro.
- ▶ Dabeysha waxaa faafin kara dadka qaba faayruska balse aan lahayn calaamado.

Waa maxay calaamadaha iyo astaamaha xanuunkan?

Inta badan dadka qaba dabeysha wax calaamado ah maba yeeshaan.

- ▶ Qiyaastii 25% ka mid ah dadka ayaa yeesha calaamado u eg kuwa hargabka oo kale sida:
 - ▶ Cune-xanuun
 - ▶ Qandho
 - ▶ Daal
 - ▶ Lalabbo
 - ▶ Madax-xanuun
 - ▶ Calool-xanuun
- ▶ Xaalado dhif ah, dadka ay ku dhacdo dabeysha waxay yeeshaan calaamado ah sida:
 - ▶ Qoorgooyaha (caabuq ku dhaca maskaxda iyo xangullah lafdhabarta)
 - ▶ Naafanimo ama daciifnimo ah gacmaha iyo/ama lugaha

Waa maxay fursadaha daaweynta?

Wax daawo ah looma hayo dabeysha.

Dabiibid ah jimicsi ama waxqabsiga jirka ayaa lagu caawin karaa gacmaha, lugaha, ama murqaha daciifay, ama dabiib kale oo socon doona muddo dheer.

Sidee baa looga hortegi karaa?

Dabeysha waxaa looga hortegi karo waa tallaal oo keliya!

- ▶ Carruurtu waa in laga tallaalo markay jiraan 2 bilood, 4 bilood, iyo 6–18 bilood, iyo mar kale ka hor iskuulka xannaanada.
- ▶ In ka badan 99% dadka qaata dhammaan tallaallada qiyaasta loogu tala galay ee dabeysha difaac fiican ayey ka helaan.
- ▶ Tallaalka loo isticmaalo in looga hortago dabeysha ee Mareykanka lagama qaado xanuunka dabeysha.
- ▶ Nadaafad fiican iyo dhaqista gacmaha ayaa looga hortagi karaa faafitaanka faayruska dabeysha.

Tallaallada la qaatawaxaa laga eegi karaa

[Wisconsin Immunization Registry \(Diiwaanka Tallallada Wisconsin\).](#)

BUREAU OF COMMUNICABLE DISEASES

www.dhs.wisconsin.gov/dph/bcd.htm | DHSDPHBCD@dhs.wi.gov

Wisconsin Department of Health Services | Division of Public Health

